# ISKUULKII WUU BILAABANAYAA

## –soo dhowoow!





# Qoraal loogu talagalay akhristayaasha


Iskuulka bilaabistiisa waa arin farxad iyo welwelba leh, arinkaasina ma ahan mid ku kooban carruurta oo kaliya, xitaa adiga waalid ahaan waa mid ku heysata. Waxaa dhici karta in aad soo xusuusato xilligii aad da'da waxbarashada ku soo jirtay, islamarkaana aad ka fekerto sida uu ilmahaagu iskuulka uga helaayo, uuna uga soo baxaayo arimaha iskuulka. Macallin sidee ah ayuu yeelan doonaa? Iskuulka dhigashadiisu ma mid ilmaha ku adag baa, mise waa mid aad ugu fudud? Sidee buu kooxdan aadka u badan ula qabsan doonaa, iyadoo qaar ka mid ah ilmaha ay yihiin kuwo xishood badan oo aamusan, halka qaar kalena ay ka yihiin kuwo laga yaabo in ay ku adag tahay in ay booskooda fariistaan? Carruurta kale oo dhan ma waxay heystaan telefoono cusub oo qaali ah, mise wax telefoon ah maba heystaan?
Sidee buu cunuggaagu kooxda ula qabsan doonaa?

Looma baahna in aad arimahaas ka welwesho. Fasalku waa mid qaada carruur badan oo kala duwan, mid walbaa oo iyaga ka mid ahna booskiisa wuu ka heli doonaa fasalka.

Adiga waalid ahaan waxaa ay kuu noqoneysaa biloow fiican, haddii aad iskuul dhigashada ilmahaaga u qaadatid qaab wanaagsan oo is aaminaad leh.

Iskuulka ma ahan mid la mid ah sidii uu ahaa xilligii aad adigu iskuulka soo dhigan jirtay. Si aad u hesho fahamka dhabta ah ee ku saabsan iskuulka xilligaan haatan lagu jiro, waa in aad ahataa qof aad u xiiseeynaaya, rabana inuu wax ka ogaado arimaha iskuulka, islamarkaana si geesinimo leh u weydiinaaya macallinka, haddii ay jiraan wax welwel ah oo ka heysta arimaha iskuulka. Adigu waxaad ilmahaaga u tahay tusaale aad u muhiim ah oo ay wax walba kaga dayanayaan. Aragtida wanaagsan ee aad ka heysato ariamaha iskuulka waxaa ay si dadban uga soo ifbaxeysaa ilmahaaga. Khibraddaadii gaar ahaaneed ee arimaha iskuulka aad ka soo martay, looma baahna in ay noqoto tan go'aanka aad kaga gaareyso, arday noocee ah ayaad noqoneysaa adigu waalid ahaantaada.

Waxaan rajaynaynaa in qoraalkaan aad ka hesho fikrado taageeraya cunuggaaga, una noqonaaya biloow fiican oo uu ugu dhaqaaqo dhanka waxbarashada iskuulka.



# Iskuulka xilligaan la joogo

IWaxaa dhici karta in waalidku ay ka soo qaadaan in iskuulka xilligaan jira uu la mid yahay kii ay iyagu soo dhigteen waqtigii waxbarashadooda. Waxaa dhici karta in aad sawirato oo hortaada keento miisaskii isdabayaallay, islamarkaasna aad xusuusato leyliskii yeeriska ahaa ee todobaad walba laguu soo diri jirey. Waxaa dhici karta in iskuulku uu wali u muuqdo si la mid ah sidii hore, laakiin waxaa jira fasallo ay ilmuhu leyliska kaga shaqeeyaan iyagoo dhulka jiifa, ama akhriska ugu horeeya ku baranaaya kombiyuutrada yaryar ee la yiraahdo tabletiga, ama leyliska xisaabta ku tirinaaya keynta dhexdeeda. Iskuulku wuu isbedelayaa, waana arin wanaagsan. Sidoo kale degaanka ku hareereysan iskuulka xitaa wuu isbedelayaa, iskuulkuna waa mid la jaanqaadayaa isbedelladaas.



Dalkan Finland macallimiintu waxaa ay awoodaan in ay si madaxbannaani ah uga dhex shaqeyaan fasalka dhexdiisa, islamarkaana ay go'aan ka gaaraan qaabka ay ardayda wax u barayaan, marba haddii ay raacaayaan qorshaha waxbarashada ee la dejiyay. Waana sababta ay howlmaalmeedka iskuullada u kala duwan yihiin, oo iskuul walbaa uusan kan kale ula mid ahayn. Qaar ka mid ah macallimiintu waxaa ay bixiyaan jadwal waxbarasho, kaasoo dhammaan maadooyinka la diyaariyay, halka qaar macallimiinta kale ay ka isticmaalaan jadwal waxbarasho oo la calaamadeeyay oo kaliya, mana jiro hal buug oo kan kale la mid ah.

Waalidku waa in uu aaminaa macallinka, islamarkaana uu si geesinimo leh u weydiiyaa haddii ay jiraan arimo aan u caddeyn oo mugdi uu kaga jiro ama maskaxdiisa ku wareegaaya.



Iskuulka jira xilligaan maanta ah ee aynu joogno, waxbarashadiisu waa mid isla socota. Iskuulka dhexdiisa waxaa la hubiyaa, sida ay isugu xiran yihiin arimaha la baranaayo, halka markiiba hal maado la baran lahaa.  Waxaana arinkaan loo yaqaannaa ama loogu yeeraa mideynta waxbarashada.



Shaqada iskuulku waa in ay ilmaha baraan xirfado kala duwan, kuwaasoo faa'ido u leh mustaqbalka ilmaha. Waxaana kuwaa ka mid ah tusaale ahaan aqoonta warbixinta iyo isgaarsiinta teknoloojiyadda iyo xirfadda wax akhriska ee kala duwan (xirfadda fasiraadda, wax soo saarista, qiimeynta farriimaha iyo warbixinaha kala duwan). Dhammaan xirfadahaasna qaabab kala duwan ayaa loogu tababar qaataa maadooyinka oo dhan.

Waxaa iskuulka xoogga la saaraa sidii ay waalidka iyo ardeyduba uga qeybqaadan lahaayeen arimaha iskuulka. Waalidka iyo ardeyduba waa ay ka qeybqaadan karaan howlaha la xiriira dejinta qorshayaasha, qiimeynta iyo wadahadlka laga yeelanaayo marka armahaas la qiimeynaayo.

Si codka waalidka iskuulka looga maqlo, waa in suurtagalnimada arimahaas looga faa'iideystaa oo lagu qiimeeyaa kulamada waalidiinta ee uu iskuulku qabanqaabiyo.

Sidoo kale qiimeynta ardeyga iskuulka dhexdiisa waa mid ka duwan sidii hore. Waa mid xoogga saareysa howlaha socda ee waxbarashada, islamarkaana ah mid leh dhiirigelin oo dhinacyo badan taabanaysa. Ardeydu waxaa kaloo ay ku tababar qaadanayaan sidii ay qiimeyn ugu sameyn lahaayeen waxbarashada iyaga u gaarka ah iyo tan ardeyda kale. Ujeedada ugu muhiimsan ee qiimeyntaas laga leeyahayna waa sidii loo taageeri lahaa arimaha ku saabsan waxbarashada. Bixinta shahaado loo qoray qaab lambar ahaan ah waxaa loo wareejiyay fasallada sannad dugsiyeedka sare, waxaana iskuulka dhexdiisa laga isticmaalaa wax badan oo aragti celinta af ahaaneed ah iyo qiimeynta hadal ahaaneedba.



Qorshaha waxbarashada ayaad ka akhrisan kartaa faahfaainta dheeraadka ah ee ku saabsan arimaha waxbarashada iyo howlaha uu iskuulku qabto, taasoo sida guud laga heli karo bogga internetka ee iskuulka, islamarkaana waalidiinta loogu soo bandhigo iskuulka dhexdiisa.





# Kalsoonida ka dhexeysa guriga iyo iskuulka

- Kalsoonida ka dhexeysa guriga iyo iskuulka waxaa ay ilmaha u xoojineysaa ka helitaankiisa iskuulka iyo ammaankaba. Waligaa marnaba waxba ha ka sheegin iskuulka, iyadoo uu ilmuhu ku maqlaayo.
- Is aaminaaddu way sii kordheysaa, marba haddii iskuulka iyo guriga uu ka dhexeeyo wadahadal ku filan, iyo markii labada dhinacba ay si wanaagsan isu dhegeysanayaan, isuna qiimeynayaan
- Kalsoonida ka dhexeysa iskuulka iyo guriga waxaa ay saameyn ku yeelanaysaa waxbarashada ilmaha iyo sidii uu iskuulka guul uga gaari lahaa.

Waagii hore waxaa loo heystay ama lagu fekeraayay in iskuulkuna uu qaabilsan yahay wax kaqabashada arimaha waxbarashada,guriguna barbaarinta. Hadda waxaa xoogga la saaraa muhiimadda ay leedahay ka qeybqaadashada guriga ee arimaha waxbarashada iyo wada shaqeynta guriga iyo iskuulka. Markii ay iskuulka iyo gurigu luqad isku mid ah ku wadahadlayaan, ay leeyihiin wadashaqeyn, islamarkaana uu midba kan kale taageeraayo, carruurtu si wanaagsan ayay iskuulka uga helayaan, howl-maalmeedka iskuulkuna waxaa uu noqonayaa mid aammin ah.

Wadashaqeyn wanaagsan oo ku dhisan kalsooni oo u dhexeysa iskuulka iyo guriga, waxaa ay ilmaha ka caawineysaa dhinaca waxbarashada iyo in uu si fiican u joogo iskuulka. Kalsoonida ka dhexeysa iskuulka iyo guriga waa ay sii xogeysanaysaa, marka ay waalidka iyo howlwadeennada iskuulku marar badan si joogto ah u kulmaan, islamarkaana ay si wanaagsan isu bartaan. Si wadajir ah oo loo sheekeysto ayaa keeneysa in qofba kan kale aragtidiisa uu u si fiican u fahmo.

Kalsoonida ka dhexeysa iskuulka iyo guriga waxaa shardi u ah in la helo wadaxaajood ku dhisan fir-fricooni iyo waji furnaan. Kalsooni ma dhalaneyso haddii aanu jirin xiriir joogto ah oo u dhexeeya iskuulka iyo guriga, ama qaabka warbixinaha la isugu gudbinaayo uu yahay mid kala dhiman. Waalid ahaan waa inaad ahaataa mid firfricoon oo xiriir la leh iskuulka. Si kastaba waa in aad ixtiraamtaa xilliyada shaqada ee macallinka, iskana hubi goorta iyo qaabka ugu wanaagsan ee macallinka loola kulmi karo.

Mararka qaarkood waxaa dhici karta in uu ilmuhu uu iskuulka ka soo sheego waxyaabo la yaab ku keena guriga. Waa in mar walba ilmaha la dhegeystaa, si dhab ahna loo qaataa waxa uu sheegaayo, haddana waxaa islamarkaaba haboon in la xusuusnaado, in ilmaha ay ku adag tahay in uu garto ama fahmo arinka oo dhan. Haddii arinkaas uu ilmuhu kuu sheegay uu yahay mid maskxdaada wax ku reebay, la xiriir iskuulka oo iska ogow ama ka caddayso sida ay arinkaas dhacay u arkaan . Waxaa arin muhiim ah in aadan iskuulka ama macallinka wax xun ka sheegin iyadoo uu ilmuhu ku maqlaayo. Taasi waxaa ay baabi'ineysaa kalsoonidii uu ilmuhu u hayay iskuulka.

Maxaad maanta ciyaareysaa xilliga bareegga?

Maxaa kaa qosliyay adiga manta?

Maxaa maanta ugu fiicnaa waxyaabihii aad iskuulka ku soo qaadatay?


# Ka qeybqaadashada arimaha iskuulka

Maxaa manta iskuulka dhexdiisa ku faraxgeliyay?

- **Qaabka ugu wanaagsan ee looga qeybqaadan karo waxbarashada iskuulka ee ilmaha, waa in aad ilmaha weydiiso howlmaalmeedkii iskuulka, in aad ilmaha ku geesinimo galiso kuna dhiirigeliso inuu si fiican wax kuugu sheego, islamarkaana ilmaha laga caawiyo ka shaqeynta leylisyada loo soo direy.**
- **Marka aad tahay waalid xiiseeynaaya arimaha iskuulka, waxaad ilmahaaga u muujineysaa, in iskuulku uu yahay mid muhiim ah.**
- **In aad xubin firfricoon ka noqoto ururka waalidiinta ama howlaha gudiga waalidiintu ay ka wadaan fasalka uu ilmahaagu dhigto, waxay kuu sahlaysaa in aad barato howlaha iskuulka, macallinka iyo waalidiinta kaleba. waalidiinta kale.**

Fikradda ama mowqifka aad ka aaminsan tahay iskuulka gaar ahaan inta uu ilmahaagu yaryahay, waxaa ay saameyn ku yeelanaysaa sida uu ilmahaagu iskuulka ula dhaqmi lahaa. Markii aad tahay qof xiiseynaaya iskuulka, arimaha iskuulka ku saabsanna aad sida ugu wanaagsan uga hadlayso, oo aad muujiso in iskuulku uu yahay muhiim, markaas ayuu iskuulkuna ilmaha u noqonayaa mid xaggooda aad muhiim ugu ah.

Qaabaka ugu wanaagsan ee waalidku uu si dabiici ah oo firfricoon wax uga qaban lahaa iskuulka, waa iyadoo uu ka qeyb qaato howlaha ururuka waalidiinta iskuulka ama kan gudiga waalidiinta ee fasalka. Waa arin aad u muhiim ah, in aad muujiso xiisaha aad u heyso arimaha iskuulka iyo in aad ka qeybqaadato shirarka la kulanka waalidiinta iyo la kulanka macallinka amaba aad ka qeybgasho kulanka wadaxaajoodka ee qiimeynta ardeyga. Sidaas ayaad ilmahaaga ugu muujin karaysaa in aad qiimeyneyso waxbarashadiisa iskuulka.






## GOOBJOOG AHOOW OO KA QEYBQAADO:

- Soo booqo iskuulka xilliga maalinkii ee waxbarashadu socoto. Sidaas ayaad fikrad uga qaadan karataa ama ku fahmi kartaa howlmaalmeedka iskuulka, waxaana kuu fududaaneysa in aad ilmahaaga arinka iskuulka kala sheekeysato. Waalidku waxaa uu xaq u leeyahay in uu iskuulka soo booqdo maalnka waxabarsho ee caadiga ah.
- Ka qeybqaado la kulanka macallinka, shirarka loo qabto waalidka iyo dhammaan munaasabadaha kale ee uu iskuulku soo qabanqaabiyo.
- U alif ilmaha qaabab kala duwan oo aad ku weydiineyso “side buu maanta iskuulku ahaa?”
- Haddii ay jirto arin ku welwel gelineysa, si toos ah ula xiriir macallimadda, sidaas ayaad ku heli kartaa jawaabta ugu dhakhsaha badan ee la xiriirta su’aashaada.
- Ka qeybqaado howlaha ururka waalidiinta ama kuwa gudiga waalidiinta fasalka.
- Iskuulka waxaad siisaa aragti celein wanaagsan. Aragti celinta wanaagsan waxaa ay macallinka ku dhiirigelineysaa in uu shaqadiisa sii wado, waxaana ay xoojineysaa kalsoonida ka dhexeysa iskuulka iyo guriga.



# Taageerista iskuul dhigashada ilmaha

- Waxaad si aad ah diiradda u saartaa howsha uu ilmahaagu qabanaayo, halkii aad xoogga ka saari lahayd natiijada waxqabadkiisa. Kuna dheh: “Si wanaagsan ayaad u samaysay, si kastoo ay tani u ahayd mid adag.”
- U muuji in aanay wax dhib ah lahayn haddii uu ku guuleysan waayay howsha uu qabanaayay. Waxaa muhiim ah in ilmuhu uu barto sidii uu uga gudbi lahaa arinka ah, haddii uu ku guuleysan waayo wixii uu samaynaayay, ama uu arinku noqon waayo sidii la doonaayay.
- Ha ku fekerin in ilahaagu uu yahay mid dhibaato ah, haddii arimaha qaarkood ay ku adkaadaan. Waxaad dhinaca kale ku fekertaa in ay jiraan xirfado ay tahay in ilmuhu uu ku tababar qaato, waxaadna u muujisaa ilmahaaga in aad ku geesinimo gelineyso, islamarkaana aad isaga ku taageereyso tababarkaas.



Waalidiintu inta badan waxaa ay ilmaha ka taageeraan arimaha la xiriira hiwaayaddiisa. Sidaa si la mid ah ayuu ilmuhu ugu baahan yahay taageerada waalidka ee la xiriirta dhanka iskuul dhigashada. Wax qiimo gaar ahna ma lahan arinka ah ardey noocee ah ayaad adigu ahayd. Waalid walba wuxuu awoodaa inuu taageero ka geysto iskuul dhigashada ilmihiisa, iyadoo aanay ku xirneyn sidii uu isagu waalid ahaan ku ahaa xagga waxbarashada.

**Ha ku oran:**

”Ma awoodo inaan ku caawiyo, xisaabta aad baan ugu xumahay” ama ”Alla aniga xitaa maadada iswidishku waxaa ay ahayd”.

**Waxaad ku tiraahdaa oo ka wanaagsan:**

”Haa oo arinkaan si wadajir ah ayaan uga gudbeynaa”, ama ”Alla fiicanaa, anigu xitaa waxaan hadda bartay waxyaabo cusub”.

Waa arin aad u muhiim ah in la ogaado, in waqtigaan xaadirka ah iskuulka xoogga la saaro arimaha la xiriira xirfadaha waxbarashada iyo howlqabashada, halkii xoogga laga saari lahaa natiijada ugu dambeysa. Ilmuhu waa in mararka qaarkood uu waajahaa guuldarada – waxaan halkaas ka baranaynaa khaladaadkeena. Waxaa aad muhiim u ah in aannaan abuurin jawi uu ilmuhu kaga baqo guuldarrada. Haddii ka cabsashada guuldarrada ay ka xoog badato suurtagalnimada ah in la guuleysto, waxaa dhici kara in ilmuhu uu si fudud isu dhiibo, oo xitaa uusan ku dhicin in uu wax isku dayo.

Isku dayga iyo adkeysiga ayaa saameyn ku leh natiijada ugu dambeysa. Haddii adiga xilligaagii iskuulka ay maadada xisaabtu kugu adkayd, waa in aad fahamtaa ilmahaaga, haddii uusan jecelyn maadada xisaabta. Laakiin si kastaba arinkaasu sabab uma noqon karo, in aan loo baahneyn in ilmuhu uu isku dayo inuu xisaabta sameeyo. Wax ka filashada wanaagsan waxaa ay taageero ka geysanaysaa kalsoonida uu ilmuhu naftiisa ku qabo. Wuxuu u baahan yahay in si isu dheelitiran loo siiyo taageero, geesinimo gelin, in la ammaano, talo siiin iyo wax ka dalbidba.

Haddii aad dareento, in ilmahaaga ay heystaan dhibaatooyin la xiriira xagga waxbarashada ama xirfadaha arimaha bulshada, ha ka labalabayn in aad la xiriirto iskuulka. Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu helo taageerda la xiriirta waxbarashada iyo iskuul dhigashadaba. Taageerada waa in loo fidiyaa sida ugu dhakhsaha badan,iyadoo la eegaayo hadba baahidiisu inta ay le’eg tahay, islamarkaana ay sii socotaa illaa iyo inta ay ka jirto baahida taageradaasi. Macallinka waxbarashada khaaska ah ka sokow, waxaa iskuulka jooga sooshaalka ama kuraatoriga iskuulka, ama saykolojiistaha iyo kalkaalisada caafimaadka, kuwaasoo aad la xiriiri karto marka aad dooneyso in aad kala hadasho arimaha la xiriira waxbarashada iyo iskuul dhigashada ilmahaaga.



# Xiriirka saaxiibtimo


- **Si ilmahaagu wax walba ay ugu wanaagsadaan fasalka dhexdiisa, Waa IN DHAMMAAN carruurta oo dhan ay fasalka dhexdiisa si wanaagsan ku ahaadaan. Sidaas darteed ayay muhiim u tahay in laga fekero, tusaale ahaan sidee ayaa xafladaha dhalashada loo qabanqaabiyaa, maxayse tahay waxyaabaha lagu saleynaayo marka saaxiibada fasalka loogu yeeraayo ka soo qeybgalka xafladda dhalashada.**
- **Baro carruurta kale ee fasalka iyo waalidiintoodaba. Sidaas ayay wadashaqayn uga dhex dhalan kartaa fasalka dhexdiisa, si wadajir ahaan looga hortago in aan qofna takoormin ama dhibaato loogu geysan.**
- **Kala hadal ilmahaaga arinka la xiriira saaxiibtinimada, iyo arinka ku saabsan sidii loola dhaqmi lahaa qofka kale. Tus oo u noqo tusaale wanaagsan, wax xunna ha ka sheegiin dadka adiga kula shaqeeyaa, iyadoo ilmuhu uu ku maqlaayo.**

Si uu ilmuhu iskuulka ugu wanaagsanaado, waa in uu ka helaa iskuulka, uuna dareemaa in uu ammaan ku heysto iskuulka dhexdiisa, saaxiibana uu ka helo iskuulka. Marka iskuulka uu bilowdo waxaa fasalka laga sameeyaa wadajir wanaagsan, waxaana lagu tabarbarqaataa xirfadaha la xiriira arimaha bulshada. Waxba ha degdegin, haddii ilmahaaga uu si dhakhso ah u baran waayo arimaha cusub. Sidoo kale waa in guriga dhexdiisa ilmaha laga taageero sidii uu u sameysan lahaa xiriir bulshadeed. Waalid ahaan waxaad ka qeybqaadan kartaa sidii lagu samayn lahaa fasal uu ka dhexeeyo wadajir. Si wadajirka fasalku u shaqeyso, waa in ilmaha la baraa sidii uu dadka ula yeelan lahaa wada shaqayn, u noqon lahaa qof wax ogol, islamarkaana uu u xakamayn lahaa habdhaqankiisa. Sidoo kale xitaa ilmaha yar wuxuu ka

mas'uul yahay nololwanaagga ka jira fasalka dhexdiisa, waalid ahaanna waxaad ilmaha ka taageri kartaa sidii uu mas'uuliyaddaan ku qaadi lahaa. Tusaale ahaan waxaad ilmahaaga bari kartaa in dhammaan carruurta fasalka ku jirtaa uu ula dhaqmo si saaxiibtinimo leh, uuna dhammaantood la ciyaaro. Si joogto ah ilmahaaga u weydii saaxiib sidee ah ayuu la yahay dadka kale. Si cunuggu uu kooxda dhexdeeda u noqdo mid wanaagsan, loona aqbalo, waa in uu ku tababar qaataa u hogaansanka sharciyada. Tusaale ahaan waa in uu bartaa in laga guuleysan karo, mararka qaarkood uu u ogolaado in dadka kale ay go'aan gaari karaan, islamarkaana uu doorkiisa qaato.

Cunuggaagu wuxuu iskuulka ku baranayaa carruur farabadan oo kala duwan. Waxaa muhiim ah in aan waalidku  ka tala bixin cidda uu ilmuhu la ciyaari karo. Taas bedelkeeda carruurta fasalka ugu yeer gurigaaga, islamarkaana u fiirso oo eeg sida ay carruurtu u wada ciyaarayaan. Xafladaha dhalashadu waxaa ay ilmaha u yihiin kuwo aad muhiim ugu ah, mana jiro qof doonaaya inuu ka mid noqdo dadka aan loo yeerin ee laga tagay. Isku day inaad ka fekerto arimo kala duwan oo la sameyn karaayo, haddii aan guriga loogu yeeri karin dhammaan carruurta oo dhan in ay ku xafladeeyaan.  Waxaaba dhici karta in dhowr ka mid ah carruurta ay isku mar wada leeyihiin xafaladda dhalashada, sidaas awgeed ayaa waxaa si wadajir ah xafladdaas  loogu sameyn karaa   naadiga  ku yaalla guriga hoostiisa, ama guriga mid ka mid ah ilmaha kale, kuwaasoo heysta goob waasic ah oo ku filan xafaladda, muhiimadda waxaa weeye in mid ka mid ah carruurta uusan dareemin in uu isagu yahay kana an looyeerin ee laga tagay.

Ilmuhu waxaa mid walba leeyahay dabeecad u gaar ah, waxaana dhici karta in qaarkood ay ku adag tahay in uu la qabsado howsha ka socota fasalka. Macallinka waxaa saaran waajibka ah in uu xifdiyo sirta dadka, cidna uma sheegi karaan dabeecadaha gaarka ah ee ilmaha, iyadoo aanay wax fasax ah ka heysan waalidkiis. Haddii ay jiraan dabeecado u gaar ah oo uu ilmahaagu leeyahay, waxaa haboon in aad ogolaanshaha ilmahaaga ugu sheegto waalidiinta kale iyo carruurta fasalkaba. Markaas ayay dadka kale fahmi karaan, maxay tahay sababta uu ilmahaagu mararka qaarkood u tagaayo fasalka macallinka khaaska ah , uuna leeyahay qof caawiye u gaar ah isaga, amaba uu sameynaayo leylisyo ka duwan kuwa ay carruurta kale sameynaayaan.




Dhibka iyo qashqashaadda

- **Qashqashaadda iyo dhibku wuxuu mararka qaarkood ka soo ifbaxaa dhammaan iskuullada oo dhan.**
- **Qashqashaaddu sida guud ahaaneed waa dhacdo kooxeed.**
- **Howsha firfricoonida leh ee waalidku ka sameeyo sidii loo xoojin lahaa nololwanaagga fasalka ilmaha, waxaa ay si xoog leh uga hortageysaa qashqashaadda iyo dhibka.**

Waalid badan ayaa waxay ka welwelsan yihiin, in carruurtooda la qashqashaado ama isagu uu carruurta kale ku dhibo iskuulka. Qashqashaadda iyo dhibku waxaa ay ka soo ifbixi kartaa dhammaan iskuullada oo dhan, si la mid ah sida goobaha shaqada oo kale. Qashqashaadda iyo howsha looga hortagaayaba waa mid ka duwan sida ay ahaan jirtay xilligii waxbarashadaada. Netka iyo telefoonnada gacanta ayaa dhibka iyo qashqashaadda ku soo kordhiyay qaaabab cusub, waxaana dhici karta in qashqashaaddu ay ilmaha guriga u soo raacdo. Dhinaca kale qashqashaadda iyo dhibkaba si ka fudud sidii hore ayaa maanta lagu ogaan karaa. Iskuulku waa in uu qashqashaadda iyo dhibkaba si dhakhso ah wax uga qabto, marka uu soo ifbaxo tuhunka arinkaas ku saabsan. Sidoo kale waa in iskuulku uu sameeyo shaqo xooggan oo looga hortagaayo qashqashaadda. Markii ay waalidku dhexdooda wadashaqayn fiican leeyihiin, oo ay wax wanaagsan ka sheegayaan waalidka kale iyo carruurtoodaba, qashqashaadda iyo dhibkaba waa laga hortagi karaa. Waalid ahaan waxaad tusaale fiican u noqon kartaa inaad tusto carruurtaada, sida loola dhaqmaayo dadka kale. Carruurta uu waalidkood ka soo horjeedo qashaqashaadda waa dhif in ay wax dhibaan. Waxay sidoo kale ay ku dhiiradaan in ay arinka wax ka qabtaan, haddii ay dareemaan in uu jiro qof uun qashaqashaad loo geystay.

- Qashqashaadda ama dhibka waxaa loola jeedaa, in hal qof ama dhowr qofood ay si joogto ah u qabsato fal aan wanaagsanayn oo kaga imaanaya qof ama dhowr qofood (maskixiyan, jir ahaan ama hadal ahaan)
- Qashqashaaddu waa fal dhif ah oo uu geysto qof. Inta badan waxaa ku weheliya caawiyayaal ama kuwo ku dhiirigeliya.
- Qashqashaadda ilmaha dhexdooda ka jirta, waxaa dhici karta in waalidku uu ogaan waayo.
- Carruurta qashqashaadda ama dhibka loo geysto inta badan uma sheegaan dadka waaweyn waxa ku dhacay, waxaa dhici karta in ay ka xishoodaan sheegista arinkaas ama ceeb dareemaan, amaba ay aaminsan yihiin in ay u qalmaan in sidaasi loola dhaqmo.
- Had iyo goor la xiriir iskuulka, haddii aad ogaato in ilmahaaga ama qaar kale oo ka mid ah carruurta fasalka dhib iyo qashqashaad lagu haayo.
- Ha difaacin habdhaqanka ilmahaaga, haddii aad ogaato, in uu wax dhibaayo, ku caawi cunugaaga inuu joojiyo qashqashaadda iyo dhibkaba.

# Leyliska



- Waxaad guriga ka sameysaa xaalad iyo qaab joogto ah oo leyliska looga shaqeyn karo.
- Ku dhiirigeli ilmaha in uu qaato mas'uuliyadda ka shaqeynta leyliska. Waxaad qaadataa kaalinta caawimaadda, diyaarna noqo markii laguu baahdo.
- La xiriir macallinka, haddii uu leylisku yahay mid aad u adag, uuna ilmaha yar ka qaadanaayo waqti badan, ama uu markasta guriga ka dhex abuuraayo muran iyo ismaandhaaf. Waxaad si wadajir ah uga fekeri kartaan, xalalka idiin keeni kara in aad wax wanaagsan ka gaartaan howshaas.

Fasalka koowaad waxaa ay ilmuhu aad u xiiseynaayaan ka shaqeynta leyliska, waayo waxaa ay calaamad u tahay in ay yihiin arday iskuul dhigata. Leylisku waa arin muhiim ah, waana mida bareysa ilmaha in ay qaataan mas'uuliyadda shaqadooda iskuulka. Waxyaabaha iskuulka lagu barto oo lagu soo celceliyo ayaa lagu bartaa ka shaqeynta leyliska. Howsha ka shaqeynta leyliska, ayay waalidku ka qaadan karaan fahamka ah, sida uu cunugga yar wax ugu barto iskuulka. Qaar ka mid ah carruurta waxaa dhici karta in ay tusaale ahaan ka barteen walaalahood ka waaweyn, in ka shaqeynta leyliska ay tahay arin aan fiicneyn.

Qaar waxay xoogga u saaraan ka shaqeynta leyliska si ka duwan sida carruurta kale. Si kasta oo xaaladda ilmuhu ay tahayba, waa in guriga laga sameeyaa qaab joogto ah oo looga shaqeeyo leyliska. Ka feker goorma iyo halkee looga shaqeynaayaa leyliska. Casariye la siiyo ilmaha iyo isboorti ay sameeyaan ka hor inta aanay ka shaqaynin leyliska, waxaa dhici karta in ay ilmaha ka caawiso sidii uu si fiican diiradda ugu saari lahaa ka shaqeynta leyliska. Waxaana arinkaas dhibaato ku keeni kara in hal mar waxyaabo badan oo kala duwan la sameeyo.

Leylisku waa shaqadii iskuulka lagu soo tababar qaatay, sidaas awgeed waa in ilmuhu marka ugu horreysa uu kaligiis sameyn karaa. Adigu ka waalid ahaan lagaagama baahna in aad sidii macallinka oo kale u shaqeysaa. Waxaa arinka ku filan oo kaliya in aad u muujiso xiiseyntaada iyo in markii uu ilmuhu u baahdo caawimaad aad diyaar u tahay. Fasalka koowaad marka uu ilmuhu ku jiro waxaa leyliska ka mid ah in ilmuhu uu ku tababar qaato wax akhriska, arinkaasina waa mas'uuliyad aad u muhiim ah oo saaran waalidka. Howsha waalidka u taalla waa in uu dhegeysto, caawiyo islamarkaana uu dhiirigeliyo, waayo wax akhrintu waa arin sal u ah dhammaan waxbarashada kale.

Qodobka muhiimka ah waxaa weeye in ka shaqeynta leyliska inta lagu guda jiro fasalka koowaad, aanay qaadan in ka badan nus saac. Haddii ka shaqeynta leyliska ay qaadatao waqti badan, waxaad la xiriirtaa macallinka. Waxaa dhici karta in mararka qaarkood uu leylisku ku adkaato ilmaha yar, ama uuba aad u daallan yahay oo uusan samayn Karin. Markaas oo kale waalid ahaan waxaad adeegsataa qiimeyntaada kuu gaarka ah, una ogolow in uusan ilmuhu samaynin leyliska, waxaadna sababta arinkaas u sheegtaa macallinka. Cidina dan uguma jirto in leylisku uu noqodo mid horistaaga niyad u heynta iskuulka ee ilmaha, sababtaas awgeed ayay muhiim u tahay in arinkaas lagala hadlo macallinka.

Waxaa dhici karta in ilmuhu uu ku caajiso iskuulka, niyad u heyntiisa iskuulkuna ay hoos u dhacdo, markaasaaoo ay meesha ka baxday xiisihii bilaabista iskuulka, islamarkaana mugdigii deyrtu uu bilowdo. Buugaagta waxaa dhici kartaa in ay geesaha u kala duulaan, cunigiina uu noqdo mid qeylo iyo oohin badan , waxaana laga yaabo inuu dareemaayo in dhammaan ardayda kale ay isaga ka xariifsan yihiin. Xaaladdaas marka ay jirto waxaa waalidka laga doonayaa dulqaad iyo faham. Waana in xaladdaas loo sheegaa macallinka. Sidoo kale waxaad kala sheekeysan kartaa waalidiinta kale, waxaadna weydiin kartaa sida ay ilmahoodu ku yihiin ka shaqeynta leyliska. taageerada laga helo waalidka kale ayaa arintaas kaa caawin karta.





# Akhriska

- **Xirfad wax akhris oo wanaagsan ayaa sal u ah dhammaan waxbarshada kale oo dhan.**
- **Cod kore oo la maqlaayo ugu akhri ilmahaaga, xitaa marka uu wax akhriska barto kadib, waayo wax akhrisku wuxuu horumar ka geystaa wax akhriska cunugga iyo barashada ereyada cusub**
- **U akhri wargeyska, booqo maktabadda kalana sheekeyso buugaagta sidaas ayaad ilmahaaga ugu noqon kartaa tusaale fiican.**

Xirafada wax akhris ee wanaagsan waa waxyaabaha ugu muhiimsan ee iskuul dhigashadu u baahan tahay. Waxayna saameyn ku leedahay dhammaanba waxbarashada kale ee cunugga. Wax akhrisku waxaa uu kordhiyaa keydka ereyada cusub, wuxuu horumar ka geystaa luqad muujinta, awoodda fekerka iyo xirfadda xal ka gaarista dhibaatooyinka. Cod kore oo la maqlaayo wax ugu akhri ilmahaaga xitaa marka uu wax akhriska barto kadib, sidoo kale adiga iyo cunuggaba midba mar ayuu doorkiisa wax akhriska qaadan karaa. In cod kore wax loogu akhriyaa waxaa ay ilmaha u suurtagelinaysaa inuu fahmo dareenkiisa iyo kan dadka kale, kadib marka uu la noolaado shakhsiyaadka buugga ku xusan iyo dareenkooda.


**Faylka Macluumaadka**

- **80% keydka ereyada ee dadku barto waxaa ay ka yimaadaan qoraallada daabacan.**
- **Ereyada uu yaqaanno ilmaha toddoba sano jirka ah waxaa ay u dhexeeyaan 5 000–7 000 oo erey.**
- **17-sano jirka, wax akhriyay/ ama si joogto ah u dhegeystay qoraalka, wuxuu yaqaanna qiyaastii 50 000–70 000 oo erey.**
- **17-jirka aan waxba akhrin ama aan si joogto ah wax u dhegeysan, waxaa uu yaqaannaa 15 000–17 000 oo eray.**

Waxaa haboon inaad cod kore oo la maqlaayo ugu akhrisid luqadaada hooyo, xitaa haddii aanay aheyn luqadda iskuulka looga hadlo. Tusaale fiican u noqo, oo u akhri cunugga, si uu u arko adigoo wax u akhrinaaya. Haddii waalidku ay ilmaha ku dhiirigeliyaan wax akhriska, laakiin uusan waalidku wax buuga ah soo qaadanaynin oo uusan kalaba fureynin wax bug ah, waxaa ilmaha gaaraya farriin ismaandhaafsan.

Ilmaha in cod kore oo la maqlaayo wax loogu akhriyo waa inaan la joojin, xitaa marka uu cunuggu barto wax akhriska.

Cod kore oo ilmaha wax loogu akhriyo waa mid ku haboon dhammaan carruurta oo dhan da' kasta oo ay jiraanba. Waxaana arintaas ay ka caawineysaa ilmaha in ay fahmaan suugaanta, uusan wali awoodin in uu isagu akhristo.



Qaab nololeedka caafimaadka ku dhisan, waxaa ay taagero ka geysataa iskuul dhigashada





## Hurdada

Si uu cunuggu u awoodo inuu si fiican iskuulka u dhigto, wuxuu u baahan yahay hurdo ku filan. Hurdadu waxaa ay sidoo kale saameyn ku leedahay waxbarashada. Ardeyga dugsiga hoose ku jiraa, waxaa uu u baahan yahay habeenkii 10 saacadood oo hurdo ah. Inkastoo baahida hurdada lagu kala duwan yahay oo ay tahay mid qof walba u gaar ah, haddana arinkaas waa mid qodob wanaagsan oo lagu dhaqmi karo, sababtaas awgeedna waa in telefoonada iyo qalabka kale ee la isticmaalo waqti hore oo fiican la iska fogeeyo, kahor inta aan la seexan.

## Isboorti

Si uu caafimaad u helo, waxaa uu ilmuhu maalinkii u baahan yahay saddex saacadood oo hurdo ah, taasoo ugu yaraan saacad ka mid ah ay tahay in isboortigaa la samaynaayo uu ahaado mid si xooggan loo samaynaayo oo xagga jirka ah (tusaale ahaan orod, meel fuulid, ama dabaal). Cunugga iyo walidkuba waa in aanay saacad ka badan fadhin meeshay joogeen. Iskuulo badan oo waxaa jira la iska daayay in lagu fariisto kuraastii iyo miisaska caadiga ahaa, waxaana ay ilmuhu howlahooda waxbarasho qabsadaan iyagoo taagan ama dhulka jiifa. Qaabka shaqada oo la bedbedlaa iyo firfircconi xagga jirka ah oo la sameeyaa, waxaa ay taageero ka geystaan waxbarashada, xusuusashada iyo xasiloonida. Waxaa ay sidoo kale horumariyaan dhaqdhaqaaqa xagga jirka, waxaana ay ka hortagaan xanuunada.

## Cuntada

Si uu ilmuhu u awoodo howlmaalmeedka iskuulka wuxuu u baahan yahay in uu helo enerji ku filan. Quraacdu waa muhiim, inkastoo ay tahay mid cunug walba u gaar ah, inta uu cunuggu cunaayo subaxdii. Cuntada iskuulka ee finland waa mid tayo leh, ardayda fasalka koowaadna waxaa ay u cunaan si farxad iyo reynreyn leh. Ardeyda waaweyn ayaa kaga badan kuwa kale dhaleeceynta iyo wax xun ka sheegista cuntada iskuulka, laakiin waa muhiim in aanay waalidku la wadwadin carruurta hadalkoodaas. Waana muhiim in ardaydu ay qiimeeyaan cuntadaas iskuulka ee lacag la'aanta lagu siinaayo. Haddii cunuggu uu sheegto in gaajo ay heyso xilliga galabnimada, waxaa uu iskuulka u soo qaadan karaa, tusaale ahaan khudaar uu casariye ahaan u cuno.

# EREYADA ISKUULKA

**Gudiga maamulka** – Xubnaha gaara go'aanka, kuwaasoo degmooyinka qaarkood haga howlaha iskuulka. Gudiga maamulka waxaa ka tirsan wakiillo ka socda waalidka iyo howlwadeennada iskuulka

**Gudiga ardeyda** – iskuul walbaa wuxuu leeyahay gudiga ardeyda, kuwaasoo ujeedadoodu tahay sidii ay horumar uga geysan lahaayeen ka qeybqaadashada ardeyda ee wadashaqeynta iskuulka. Maamulka gudiga ardeyda wuxuu ka kooban yahay, ardeyda laga soo kala xulay fasallo kala duwan.

**Daryeelka ardeyda** – daryeelka ardeyda- daryeelka ardeyda waxaa ay ka taxadaraan caafimaadka wanaagsan ee maskax iyo jir ahaan, iyo nolol-wanaagga arimaha bulshada ee horumarka ka geysanaaya wada shaqeynta iskuulka.

**Waxbarashada asaasiga ah** – 1.– 9. (10.) waxbarashada fasallada, ee la siiyo dugsiga hoose.

**Mideynta** – suurtagalnimada arday walba ee ah inuu tago iskuulka isaga u dhow, iyadoo aanay ku xirneyn, ma waxaa heysata dhibaato xagga waxbarashada ama naafanimo ama xanuun. Waa in ilmuhu uu ka helaa iskuulka u dhow waxqabad taageero ku filan.

**Iskuul wanaagsan (KiVa)** – barnaamijka ka hortagga dhibaateynta, kaasoo laga isticmaalo iskuullo badan oo Finland ah.

**Xiriiriyaha fasalka** – waa waalid bixinaayaa dadaalka ah sidii uu horumar uga geysan lahaa in fasalku yeesho jawi aad u wanaagsan, islamarkaana xiriir la samynaaya macallinka iyo waalidiinta kale.

**Qalabka waxbarashada** – dhammaanba qalabka kala duwan ee loo isticmaalo waxbarashada, sida buugaagta waxbarashada, iyo maadooyinka dhinaca internet ahaanta lagu qaato.

**Qorshaha waxbarashada** – dukumintiga laga hagaayo howlaha iskuulka. Qorshaha waxbarasho ee heerka qaran ah waxaa la diyaariyaa 10-kii sanaba hal mar, waxaana laga sii dejiyaa qorshe waxbarasho oo degmo walbaa u gaar ah. Qorshaha waxbarashadu waxaa uu ka kooban yahay qeybaha guud iyo qeybaha kale ee maadooyinka waxbarashada. Qeybaha waxbarasho ee maadooyinka

waxaa lagu muujiyaa waxa ay maado walbaa ka kooban tahay iyo ujeedada laga leeyahay ee la tiigsanaayo sannad walba.

**Duqa/duqda iskuulka** – Qof waalid ah oo si iskiis ah uga shaqeeya iskuulka, kaasoo caawiye u ah ardeyda iyo macallinka fasalka, tusaale ahaan todobaadkiiba hal mar.

**Macallin aan xirfad rasmi ah lahayn** – waa qof aan heysan shahaadada laga doonaayo qofka macallinka noqonaaya, waxaase dhici karta inuu leeyahay khibrad la xiriirta shaqada macallinimada.

**Caawiye iskuul** – waa shakhsi ka hagaaya ardayda, Islamarkaana siinaaya taageero ku saabsan xagga iskuul dhigashada, kaasoo macallinka caawinaaya. Caawiyaha iskuulku waxaa uu noqon kara mid howshiisu tahay in uu hal fasal oo kaliya ka shaqeeyo, ama uu caawiye shakhsi ahaaneed u yahay ardeyda u baahan caawimaadda khaaska ah.

**Kuraatoriga/ sooshalka iskuulka** – shaaqlaha soshaalka ee iskuulka, kaasoo ka caawinaaya ardeyga arimaha la xiriira korriinkiisa iyo horumarkiisa caafimaad, islamarkaana talo iyo taageeraba siinaaya, marka ay xaalad degdeg ah la soo gudboonaato.

**Xsad kala qeybinta** – waa arin tilmaamaysa sida waqtiga waxbarashada loo qabtay loogu kala qeybinaayo ardeyda kala duwan.

**Caawimaadda ka kooban saddexda darajo** – Taageerda waxbarashada iyo magaca loo yaqaan iskuul dhigashada kala duwan ee la kala saaray.

**Diyaariyaha waxbarashada** – Heyadda u soo diyaarisa waxrashada asaasiga ah ee magaaladooda, inta badan waa degmada, laakiin waxaa ay noqon karaan dowladda ama ururada waqfiga ah.

**Gudoonka waxbarashada** – Waa hey'ad dowladeed oo ka mas'uul ah horumarinta waxbarashada.

**La kulanka waalidka/ kulanka is qiimeynta** – waa goob ay macallinka, ardeyga iyo waalidka dhalay ardeyga ay kaga wada xaajoonayaan iskuul dhigashada carruurta, sida ka helitaanka iskuulka, iyo horumarintiisaba.

**Wilma/Helmi** – waa barnaamij dhanka iimeylka loo adeegsanaayo, kaasoo haya howsha ah isku xiriirinta iskuulka iyo guriga, waxaana sidoo kale halkaasi lagu qoraa dhibcaha uu ilmuhu ka keenay imtixaannadii waxbarashada ee laga soo qaaday.

Qoraalkaan waxaa loogu talagalay waalidka ay ilmihiisu iskuulka bilaabayaan.

Sida uu waalidku u daneynaayo ama u xiiseynaayo taageerista iyo dhiirigelinta ilmaha ee waxbarashadiisa iskuulka, waxa ay saameyn muuqata ku yeelaneysaa waxbarashada iyo ka helitaanka iskuulka ilmaha.

Wada shaqeyn fiican oo ka dhexeysa iskuulka iyo guriga iyo taageerada firfircoonida leh ee waalidka waxaa ay keeneysaa:

- waxbarashada cunugga iyo dhibcaha maadooyinkiisa oo soo fiicnaada
- cunugga oo iskuulka ka hela ama jeclaada
- Xiriirka u dhexeeya macallinka iyo ardayga oo xoogeysta
- xirfadaha bulshadeed ee cunugga oo horumar sameeya

Hem och Skola

Suomen VANHEMPAINLIITTO

TEXT
Heidi Lithén
Micaela Romantschuk

TURJUMAADA INGIRIISIGA
Apropos lingua
Abdirazak Sugulle Mohamed

HABAYNTA IYO QAABAYNTA
Hanna Siira